



# Qof kasta oo 16 jir ah ama ka wayn waxa uu heleyaa talaalka COVID-19 oo bilaash ah iminka!

## Talaalada COVID-19 waa kuwo ammaan ah oo waxtar leh.

Talaalada COVID-19 waxay inaga caawinayaan inaynu ku noqono nolosheeni caadiga ahayd. Faa'idooyinka qaadashada talaalku waxay aad uga badan tahay khatarta inaad qaaddo fayraska. Badanaa dadku waxay yeeshaan astaamo yar ama dhexe oo saamayn caafimaad daro ah, sida gacanta oo xanuunta. Talaalada waxay wax badan ka taraan kahortaga xanuunada daran, dhigista isbitaalka, iyo dhimashada uu keeno COVID-19.



**Si aad u hesho bixiye kugu dhaw, booqo [vaccinefinder.org](https://vaccinefinder.org).** Waxa aad isku duwaan gelin kartaa onleyn ahaan ama taleefanka balantaada. Xarumaha qaar talaalka waxa ay aqbalaan dadka iska yimaada ama iska duwaan gelinta goobta. **Balamuhu hore ayay u buuxsami karaan. Waxaa dhici karta inay dadku isku dayaan dhawr jeer si ay u helaan balan.**

- **Talaalku waa u BILAASH qof kasta.** MAAHA inaad haysato caymiska caafimaadka, tahay muwaadin ama deggane Maraykanka, ama leedahay lambarka sooshiyaal sikiyuuritiga. Bixiyayaasha talaalku wax macluumaad ah ma siiyaan ciidamada laanta socdaalka ama bilayska.
- Waa inaad soo qaadato wax uu magacaagu ku qoran yahay (sida aqoonsi sawir leh, risiidhka kharashka adeegga laydhka iyo biyaha ee aad bixisay, ama warqad uu saxeexay qof uu ku sheegayo cidda sheegeyso inaad tahay).
- Hadii aanad haysan kombuyuutar ama Internet, ka dalbo cid aad ku kalsoon tahay inay kaa caawiso isku duwaan gelinta balanta.
- Waa inaad marka hore usii sheegtaa bixiyaha talaalka hadii aad u baahan tahay qaabilaad gaar ah (sida kaalmada luuqada ama kursiga curyaanka).

Hadii aad su'aalo ka qabto talaalka COVID-19, booqo [coronavirus.utah.gov/vaccine](https://coronavirus.utah.gov/vaccine) ama la hadal Khadka Tooska ah ee COVID-19 ee **1-800-456-7707**.